Sheeko Gaaban:

# GUBISTII BUUGTAYDA

Maxamed D. Ciise

Dhammaadka simistarka ayaa la sii galayaa, daraasadduna waa dhammaad. Maalinteydu ma ahayn maalin wanaagsan, oo odayga xun ee maamulaha kulliyadda ayaannu isku yara buuqnay.

Jaamacadda Kulliyadda Dhaqaalaha, ayaan ka dhigaa maaddada maamulidda khayraadka aadanaha. Galab dheertii ayaan shaqada ka soo baxay maanta. Ardaydii ma aan soo xaadirin, keliyata saxiixa barayaasha ayaan iska soo boobsiiyay, waxaanna hore u soo raacey Hinda.

Gaadhi Aliyoon ah ayay wadataa, waana xoghayaha xafiiska maaliyadda jaamacadda.

- " Nabadaysan Hindo, waxaan filayaa in aanan berri soo raaci doonin gaadhigaaga!"

- " Nabadsan Suldaan, ma gaadhi ayaad soo gadatay oo, sidaas baad iiga maarmeysaa?"

Laba kala baridey, kala war la'. Waxayba ii haysataa in aan soo gadtay gaadhii! Aniguna waxaan si kedis ah ugu sheegay in aan baxaayo oo aan berri subax safar u ahay Guriceel. Waxaay ii sheegtay in ay filanwaa ku tahay. Se ii rajaysay samo wanaagsan iyo in aan soo guryanoqdo aniga oo nabadqaba.

Gurigeyga darxumada la ga dheehan karo, ayay i hordhigtay. Deegaanka Soomaalida, waa iska caadi, in aad gaadhi raaxo ka soo degto misana aad dhex gasho guri

jiingad ah. Dhexdii ii xidhnayd ayaan iska furay, qolkeygii yaraa ayaan u sii gudbay aniga, oo aanan salaamin gaashaantiyo barxadda weyn ee guriga ku sheekeysanaayay.

Qub, Qac, iyo xoog u adeegsi ayuu ku furmaa albaabka qolkaygu. Keligiisnoole ayaan ahay, oo ma jirto cid ii hagaajisa oo ii nidaamisa qolkayga. Warqado yaryar oo joornaalkii shalay ahaa ayaan sii dulmaray. Kabaha iyo dharka ayaan iska bixiyay, waxaanna u soo baxay bannaanka oo musqusha iyo qolku way kala fogyihiin. Biyo caag seddexle ah ku jiro ayaan isku soo daadiyay, durbaba dhar ayaan isku soo taagay, waxa aan buugtayda kala soo baxay sheeko faneedda Gabriyeel Gaarsiya, oo dhex ii maraysay. Baraafuun ma heysto, bal se cadarmaris caraf badan oo aan galab isbuucii hore ah ka gatay wiil suuriyaan ah, ayaan isku xarxarriiqay. Wargeyskii toddobaadlaha ahaa ee Akdeemiyadda Cilmiga ayaan sariirta dusheeda ka soo qaatay. Joodariga oo dhulka ii yaalla ayaan maro yar ku sii jafay. Baakaddii sigaarka, waxaa ku hadhtay xabbad xun oo jactad la ildaran. Baakaddii ayaan soo dhufsaday, qolkana ka soo dhaqaajiyay.

Shantii Galabnimo ayay daqiiqado sii dhaafaysaa, gabdhihii aan labada jeer hareer maray ayaan af macaan ku sii salaamay. Salaan la’aan la ma ag mari karo tookadan, oo waxa aan uga baahanahay in middood ii soo shiddo xabbadda sigaar ah, si aan u sii qiiqiyo inta aan ka helayo kobashiinno xaraar fiican leh.

Isgooyska Baar Ubax ee jidka soddanka inbadan ii ma jiro. Basaska dadweynaha ayaan sii raacey, si aan u gaaro maqaaxida Bar Itaaliya, kana furan Lambar Afar. Ma jecli

galabtayda in ay iiga gebagebowdo si macnadarro ah, oo waxa aan jeclahay galabtaydu in aan cabbo shaaha, kobashiinnaha, amaba cabitaannada tamarta leh ee lagu gado jidadka waaweyn iyo isgoysyada.

Kuraasta maqaayadda banaankeeda yaalla mid ka mid ah ayaan u la jeestay jidka dhiniciisa. Wargeyskii aan sitay ayaan la soo baxay si aan iskugu mashquuliyo inta la ii keenaayo kobashiinnaha. Saxmmadda magaalada ayaan iska daawanayaa, odoyaasha hareeraheyga fadhiya ayaa igu abuurey xaraarad, oo nin walba dibno duqoobay ayuu xabbad sigaar ah kaga dhuuqaya tubaakada, igu na soo afuufayaa.

Baakad cusub ayaan ka soo qabsaday oday haysta miis yar oo uu ku gado waxyaabaha fudud. Maalmahan soosocda, magaalada waan ka sii amambaxayaa, oo Isboortis, baakad beensal ah iyo jante qurux badan ayaan soo dhufsaday. Kursigaygii ayaan ku soo noqdey, koboshiinihiina waa la ii keenay. Xoorka kofeega iyo caraftiisa ayaa horraantiiba jidhkayga saaqay. Xabaddii ugu horreysay ayaan kala soo baxay baakadka, afka hore ayaan kaga qabtay dab ka imaaday booyadda jantaha, isla markiiba bushimahayga oomman ayaan ku qabsaday qaybta dambe ee sigaarka, oo u nuugay si xamaasad iyo jaceyl leh. Dhimbil gaduudan ayuu isu baddelley afkii hore. Qiiq ka soo burqaday sambabada ayaan ka soo daayay faruuryaha, oo cantuugo xaraar ahna ku sii qaaday labadayda daan, una dejiyay caloosha. Jawigayga ayaa mar keliya isbaddelay. Aad ayaan ugu raaxaystay fadhigaygii. Wadaadkii ayaa ku dhuftay aadaankii salaadda maqrib, cid walbana way u dareertay. Maalinteydii buuqa badnayd waxaan afuufay iyada oo qiiq ah.

****

Billowgii habeenkayga waxaan u wajahayaa si xasilloon. Waxaa i soo wacday Hindo oo ii sheegtay in ay jeclaan lahayd in ay caaway ila qaadato. Durbaba waxa aan iska xaadiriyay halkii ballanta iyo maqaaxida Daash, ee Buulaxuubay. Iyadoo carafsan oo aad moodid cuudkii oo naf la geliyay, ayay ila soo fadhiisatay qeybta danbe ee maqaaxida.

- “ Suldaan, waa see jawigaagu?”

- “ Hindo, jawigu, hadda waa taagan qurxoon. Se habeen danbe tagto ayuu iga noqonayaa.”

- “ Sow adigii i baray xeerka ku noolaanshaha taaganta iyo ku raaxeysigeeda.”

Afkii ayaa juuqda gabay! Waa isla anigii oo la iiga dheereeyay xeerkii aan u jeediyay.

Sheeko iyo dheehasho ka dib, waxay ii samaysay sagootin wacan. Cid kale oo ii dhaw kuma lihi magaaladaan oo Hindo ahayn. Sababta oo ah qoyskayagu, waxa ay ku nool yihiin Goballada Dhexe. Caweys dheer ka dib waxa ay igu soo qaadday gaadhigeeda. Markii ay i keentay albaabka gurigayga, ayay daaqaddii gaadhiga iska furtay kana soo degtay. Inta ay hortayda isa soo hor qotomisay ayay laabta iigu qabatay sidii oo aam u dhoof tagayo dhul dheer iyo qaarado kale. Waxay qabatay gacantayda midig. Waxay boorso dumareedkeedii iiga soo bixisay labo baakad oo beensal ah, oo gacanta ii saartay. Waxay ii sheegtay in aan ku soo xasuusto qiiqa iyo tamarta sigaarka, daankana shumis kulul iiga dhejisay.

Gaadhigeedii caddaa iyo habeenkii shumiska kulul watayba, sidaas ayay tagto ku noqdeen. Qolkaygii ayaan gudaha u galay, dharkii ayaan iska bixiyay, joodarigii ayaan isku tuurey. Baakaddii aan soo gatay galabta ayaan kala soo baxay rasaas aan ku damiyo xasuustii maanta. Qolku waa mugdi, keliya waxaa iftiimaaya xabadda sigaarka ah. Qiic ayaan sambabada buuxsaday kana nafisey xasuustii darneyd hurdo macaanna iga soo dhacdey.

****

Shanta subaxnimo ayaan hurdada ka toosay, macawis xun ayaan dhexda ku guntaday, bannaanka ayaan usoo dhaqaaqay. Dhool ayaa shaah bannaanka ku karinaysa. Waan subaxeeyay. Isla markaasna, Fallis ayaa dhinaca kale ee barxadda guriga  xaaqaysay. Biyo qabow ayaan isku soo daadiyay, salaaddii subaxna iska boobsiiyay.

Boorso dulufowday buskana uu doorriyay midabkeedii madowga ahaa ayaan ku gurtay shaatiyaal, surwaallo, macawis iyo buugaag sheekooyin ah. Kobashiino bac yar ku guntan iyo bakeeri ayaan soo qaatay oo Dhool ka codsaday in ay bakeeriga biyo kulul iigu shubto si aan ugu darsado kofeega caanaha leh. Isla markiiba waxaan gudaha u galay qolka, baakaddii ayaan kala soo baxay xabbad sigaar ah, kofeegii ayaan soo qaatay, kursi ayaan barxadda guriga dhexdhigtay, sheekadii Gaarsiya ayaan kala furay si aan u akhristo. Subaxdayduna iigu billaabatay si deggan.

Waxa aan isa soo taagay bosteejadii aan gaadhiga Calaawiga ah ka raaci lahaa. Alaab saarid iyo islaamo qeyladaran sawaxankoodii ka dib, waxaan fadhiistay shirka hore ee gaadhiga weliba dhanka daaqadda. Gaadhigiina

waxa uu billaabay safarkii.  Hinda ayaa i soo wacday, iina rajaysay in aan nabad ku soo noqdo.

Lixdii subaxnimo ayuu gaadhiga waddada qabatimay. Xamar markii aan ka baxnay waxa aannu sii marnay dhul bannaan ah. Duhurkii ayaannu gaadhnay bartii aannu u soconnay. Gaadhigii waxa uu ku ag leexday geed qudhac ah hoostiisa, dadkii oo dhan waxaa loo degay in salaadda duhur la tukado. Salli yar oo ay odoyaal ku tukanayeen ayaan dhinac kaga tukaday. Intii salaadda dadka qaar tukanaayeen ayaan istaagay gaadhiga dhiniciisa, waxa aanna la soo baxay xabbad sigaar ah si aan u qiiciyo. Balse aniga oo shidinba, mid ka mid ah safarleydii ayaa igu la soo boodey:

- “ War ma waalan tahay? Sow ma ogid in cabbaar ka dib aannu maraynno isbaarada  Alshabaab, oo haddii sigaar lagugu qabto ay tahay dambi?”

- “ Xabaddan ayaan shidanayaa inta kale waan qarinayaa!”

Intaas kolkii aannu is dhaafsannay ayuu darawalkii gaadhigu isa soo taagay dhinaceyga iguna boobsiiyay

- "Aryaa madaxa maad dab ka rabtaa mise adoogaadaa Amiir ah?”

Dood dheer ka dib gaadhigii ayaa la soo dhaqaajiyay. Waddo jajaban ayaan dhex jibaaxnay. Goor ay tahay seddexdii galabnimo ayaan mar keliya ka war helay gaardhigii oo istaagay geedo qudhac ah hoostooda iyo laba wiil oo ku jufan qamiisyo bakistaani ah, cimaamadana wejiga ugu duuban yihiin. Jeedal ayuu midkood sitaa halka kan kalana uu wato usha geeljirayaasha oo ah mid aad u

adag, mid kastana qori AK-47 ah ayaa garabka u suran. Gaadhigii goortii uu istaagay ayuu midkood isa soo taagay dhanka daaqaddayda iguna bilaabay "Sallaamu Caleykuma Yaa Akhii." Inta aan ka naxay indhaha tooshka badan, dharka busta badan iyo kalsoonida ka muuqata wiilka ayaan ugu warceliyay "Wacaleykumu sallaam yaa akhii."

Rikaabkii ayay fareen in ay soo wada degaan, qof kastana si fudud ayuu usoo degay haba ugu darnaatee islaan hilboonoo war badnayd, darwalkana aad ugu qeylineysay. Laakiin hadda waxaan la yaabay sida degdegsiimada badan ee ay u soo degtay. Waxay dumarkii ku amreen in ay u tagaan gabdho geed kale hoostiisa taagan. Waa gabdho aad u xirxiran kuna dedan dhar madow iyo indhashareero waaweyn.  Labo nin oo aad u xoog weyn ayaa durbaba lagu amray in ay alaabta soo dhigaan dhulka. Waaba rag deggan deegaanka, aroor walbana u soo shaqo taga in ay gawaadhiada rarka ka dejiyaan, baarista ka dibna saaraan.

Intii alaabta la dejinaayay ayey labadii wiil u dhaqaaqeen in ay wareystaan raggeennii. Nin kastana waxay weydiinaayeen waxa uu qabto. Labo wiil oo dhallinyaro ahaa ayay ka xiireen madaxa dharbaaxo daranna labada daan kaga dhejiyeen. Darawalkiina waxa uu u dhaqaaqay in uu soo bixiyo lacagta boonada jidmarka.

Waxaa dhinacayga ku soo aaday mid dheer oo caato ah. Kolkii ugu horreysay ee uu i arkay ayuu igu dhahay "Muslim miyaad tahay mise Yahuudi, maxaad shaarbaha u daysatay?” Aragtidiii ugu horreysay ayuu igu xukmiyay, aniguna waxa aan ugu warceliyay "Muslim ayaan ahay, oo

timo aad deysata kaama dhigayaan Yahuudi!" Filashadaydiiba ma noqon sida aan ka filaayay. Waxa uu daankeyga qaadsiiyay dharbaaxo daran, gacmo kaaki ah oo sidii ay ul iyo qori u sideen adkaaday ayaa mar keliya daankeyga dhalanrogay. Inta uu aad u caroodey ayuu ku qeyliyay "Yaa ximaar! Gees u bax waa lagu la xisaabtamayaaye, waxaad ka mid tahay kuwa Mustashriqiinta ahe."

Waxa aan salka dhigay geed xun hoostiisa. Daantaas waxaa looga xiirayaa madaxa dhallinyaro kala duwan, daantaas kale waxaa dharbaaxo iyo gooni soocid lagu wadaa kuwa isticmaala tubaakada, dhinac sheedda kale ahna dumarkii ayaa lagu kala soocayaa. Dhinac kasta oo aad eegtid waa uun wiil jeedal la dhacaya oday aabbihii oo kale ah. Mid dharbaaxo ku dhufanaaya nin isaga ka weyn, gawaadhi alaabta laga daadinaayo, darawal xun oo bac lacag ah la sii ordaaya. Oo waxaan isweyddiiyay ma bankii qiyaamahaan joogaa? Waa maxay isxisaabintan iyo ciqaabtani!

Alaabtii la soo dhigey dhulka ayaa lagu bilaabay baaris. Waxaa gebi ahaanba la daadiyay boorso walba iyo jawaan waliba wixii ku jiray. Boorso weliba sidii loo gedgeddinaayay waxaa uu wiilkii la soo boodey "Yaa iska leh boorsadaan buska badan ee buugta gaalada iyo baakadaha sigaarku ka buuxaan?" Meel gees ah aniga oo fadhiyo ayaa cod sii dhimanaya ku idhi "Aniga ayaa leh akhii!" Cid kasta indho ubiqid mise quus, ayay igu soo eegeen. Isaga oo indho aad u kulul igu soo eegaaya ayuu mid kale ku dhahay "Yaa musharraful mujaahid ninkaan geey xarunta amiirka si xukunkiisa loo marsiiyo, ninkaan ilaahiisa ayuu ka furtaye."

Neef dheer ayaan qaatay. Waa duul doonistooda liidata, rabbi ugu marmarsoonaya. Markaas ayuu mid indho duuban ii yimid ushii geela lagu raaci jirey ayuu garabka iiga dhuftay iguna amray in aan kaco. Indhaha ayuu igaga xidhay cimaamad uu watay, shaatigii aan sitayna garbaha ayuu iiga duubey. Dhawaaq meel dheer ah ayaan maqlayaa darwalkii oo ku qaylinaya in aanan la i geyn saldhigga, ee lacagta aan halkaan ku bixiyo. Bal se waxaa lagu amray in uu dhaqaajiyo haddii kalena, isagana la igu dari doono.

Boorsadaydii iyo aniga oo indhaha ka xidhan ayaa dusha la naga saaray gaadhi Cabdibile ah, oo markii hore yaallay qorraxdhaca halkii baaridhistu ka socotay. Waxaa la ii kaxeeyay saldhigga oo aanan garanaynin jihada uu iga xigo.

Gaadhigu meel uu ii wado ma garan karo, jihada loo socdana ma qiyaasi karo oo indhaha ayaa la iga xidhay. Socod dheer ka dib, waxaan ka war helay gaadhiga oo istaagay iyo codadka rag kala duwan. Gaadhigii waa la iga soo dejiyay, bal se intii aanan indhaha la iga furin ayaan maqlay cod xanaaqsan oo ku leh wiilkii i soo qabtay "Yahuudigaan xaggeed ka keenteen?" Waxa uu sii raaciyay "Orod oo i dhaafi."

Galabtii waxa la igu xareeyay qol xun oo isaga dhan dhiig iyo arxandarro ay ka muuqdaan. Shaatigii ayaan garbaha saartay jilbahana isu dhaafsaday si aan u fakaro. Waxa ugu weyn ee aan la anfariirsanahay ayaa ah: sida aan isu mooday iyo sida aan halkaan ka noqday. Yaab! Macallin jaamacadeed sow ma ahayn markii aan soo raacaayay gaadhigii? Muxuu ahaa wiilkaan yar ee usha la dhacayay

macallinkii dhammaa? Anfariir iyo fajac dheer ka dib waxa iridda ka soo galay wiil yar oo cod kulul, oo igu amray in aan bannaanka u soo baxo. Abbaaro salaaddii casir ka dib ayay ku beegan tahay. Wiilkii waxa uu i soo geliyay qol ay fadhiyaan rag wada indho duuban, badankood wey taagtaagan yihiin marka laga reebo axad gar weyn oo qiyaas ahaan da'diisu tahay afartameeyo. Kursi yar oo buluug ah ayuu wiilkii ii dhigey iskana dhaqaajiyay. Wiilkii waxa uu ii noqday wehel intii aan soo socday, oo dhaqsiba waxa aan u darsaday la jooggiisii ka dib indhahaan galkoodii soo dhaafay markii aan ka naxay. Waxa uu uu igu billaabay in uu wax badan iga weydiiyo shaqadeyda magaalada iyo tan waxbarashadayda. Warcelinno badan ka dib waxa uu si toos ah ii su'aallay: "Boorsadaada maxaa ka buuxiyay daroogada?" Indho kulul oo aad u naxariis daran ayuu igu soo eegayaa isaga oo ay hortaallo boorsadaydii misana gacantiisa ku haayo baakaddii sigaarka ahayd iyo jantihii.

Garaaca wadnahaygu wuu sii kordhayaa. Markii hore oo ay baakaddaan sigaarka ah i soo galaysay sidan si lamid ah ayuu wadnuhu ii garaacmayay. Se markaas gacmihii naxariista badnaa ee Hinda, ayay ku jireen. Haddan, waxay ku jiraan gacmo ugaarsade duurjoog ah. Aniga oo isla maqan ayaan ku dhahay: "Amiir, aniga waxa aan ahay dadka qabatimey sigaarka ee waan joojinayaa markaan uun i cafiya." Codsi ayaan durbaba dhiibtey. Cabsida daran waxaan iiga sii daraya addoomadan dushayda taagan iyo indhahan soo fiiqan.

- “ Boorsadaada waxaa kaloo ku dhexjira buug ay qoreen gaalo duqowday, oo qaarkood dhinteen naartana lagu cadaabaayo. Maxaa kugu qasbay in aad akhriso

buugta ay leeyihiin kuwa rabbi ku kufriyay kana jeestay diintaan suubban?" Ayuu i weydiiyay isaga oo kor u qaadaayo buugga sheekofanneedda ah ee uu qorey Gabriyeel Gaarsiya Maarkiis, indhihuusan muujinayaan caro aad u daran oo uu u qabo nin aysan weligood kulmin. Bal muxuu ku sameeyay waa yaabe? Mooji!

Isma lahayn weydiin iyo dacwo ayay kugu noqon doonaan buugta aad iibsato mushaarkaygana aan bil walba uga jaro qoondada ugu badan. Isamaba lahayn taas. Waxaa se kaloo aan la anfariiray in uu diiddanyahay isticmaallidda waxsoosaar ay gaalo leeyihiin, isaga oo isticmaalaaya hubka, dharka, iyo dhammaan qalabyada ay soo saaraan.

Anfariir! Kuma dhaco in aan kaga warceliyo weydiintiisa si adag iyo macangagnimo, waxa aan ku soo koobay aniga oo hoos eegaaya: "Waan ku qaldanahay se waan ka fiirsanayaa hadda kaddib." Waxaan sii raaciyay in aan diyaar u ahay wax walba oo la igu amro.

Isaga oo aad u careysan ayuu igu amray in qolkii la igu celiyo hortiisana la iga dhaqaajiyo, waxaana la igu soo celiyay qolkii arxan darrada badnaa.

***

Goor ay tahay habeenkii, qiyaastiina ay ku beegantahay saqdhexe, ayaan u soo dhaqaaqay dhankii iridda kuna cataabay in aan u baahanahay suuli. Durbaba waxaa igu soo dhaqaaqay wiil yar oo af duuban iina soo kaxeeyay dhankii suuliga. Intii aan ku jirey xaajo gudashada ayuu ii soo uray sigaar. Waxa aan isku qanciyay in uu jirkayga ka soo uraayo, se waxa malahaygii buriyay markii aan arkey wiilkii oo faraha dhexdood ay ugu jirto

xabbad af gaduudan. Waan ANFARIIRAY! Indhaha ayaan marmaray si aan u hubsado, se waaba dhab. Waxa aan ka codsaday in uu ii dhiibo si aan iskaga dejiyo xaraaradda daran ee i haysay. Markii uu ii dhiibayay waxa uu iga codsaday in aan boobsiiyo oo ay tahay faldambiyeed in lala wadaago maxaabiista sigaar. Markii uu i keenay qolkii ayaan weydiiyay sabab uu isagu u cabbayo se dadka kalana loogu diidaayo? Waxa uu iigu warceliyay "annagu muslimiinta ayaan ku difaaceynaa si aan u soo jeedno caawa oo dhan una gudanno waajibka rabbi." Waan iskaga aamusay.

Labadii duhurnimo ayuu wiil yar oo aan ahayn kii xalay, iridda qolka iga furey iina jiheeyay dhankii qolkii amiirka saldhigga. Waxa uu ku fadhiyaa kursi iyo miis yar, khaanad yar ayaa ka dambaysa hortiisana waxaa taalla boorsadaydii. Waxa uu wiil meesha taagnaa ku amray in la i saaro gaadhiga ugu horreeya ee meesha baarista ka baxaaya ee u socdo halkii aan rabey.

Waxaan ka soo baxnay qolkii aniga oo sita boorsadeydii, bal se waxaa innaga daba yimid Amiirkii iyo wiil yar oo la socday. Waxa uu amray in shaarbaha la iga xiiro. Hadal ayaan maagay se waxaa daankayga ku dhacday dharbaaxsho aad u daran iyo labo ul. Waana la iga xiirey gebi ahaanba shaarbihii.

Waxa uu sida oo kale amray in buugta aan sito oo dhan la iga gubo. Hortayda ayuu wiil yar ku daadiyay, dabna qabadsiiyay. Dhab ahaantii waxaan dareemaayay xanuunka qarashkii iga galay. Se awood uma lihi in aan ficil sameeyo. Baakaddii sigaarka ahayd iyadana waxaa la ii sheegey in ay ku soo jeedayaan naftood hurayaashaan

muslimiinta u hiillinaaya. Indhaha ayaa la iiga soo xidhay shaatigaygii gaadhigiina isla sidii oo kale ayaan u soo raacay. Durbaba waxa aan soo gaaray goobtii baarista. Halkaas ayaan ka raacey gaadhi kale.

Dhammaad.